

Jooji TB da

Cudurka Qaaxada (TB) da waa la daaweyn karaa, laga hortagi karaa lana ciribtiri karaa!

Cudurka Qaaxada (TB) waxaa lagu kala qaadaa marka uu qof cudurka TB da qabo qufac ama hindhiso jeermigana uu ku sii deeyo hawada. Qof kasta ayaa qaadi karaa cudurka TB da.



Marka aad ku neefsatid hawada sida jeermiska TB da, jeermigu wuxuu gaarayaa sambabadaada.



Mararka qaarkood jeermisku wuxuu u gubayaa xubnahaaga kale.




Infekshanka TB da

Haddii uu jirkaaga awood fiican leeyahay wuu **joojin** kara taranka jeermiga TB da.

Jeermiga jirkaada ayuu ku jiraa, hase yeeshee ma tarmaayo mana ku jiraneysid. Heerkan waxaa lagu magacaabaa Infekshanka TB da.

- Ma **qaadsiin kartid** TB da dad kale.
- Ma **bukooneysid**.
- Tijaabada maqaarka hubaal ayey noqon kartaa.
- Raajadaada feeraha caadii ayey noqon kartaa.



Waxaad **qaadan kartaa** daawo si uusan jeermiga korkaada ugu tarmin kuuna keenin cudurka TB da. Daawada TB da waa lacag la'aan!

Cudurka TB da

Hadduu jirkaaga daciif yahay, ma **joojin karo** taranka jeermiga TB da. Jirkaaga daciif ayuu noqonayaa haddii aad cudur kale qabtid, dhibaateysan tahay ama aadba duqowday.

Jeermigu wuu kugu tarmayaa wuxuuna kuu keenayaa cudur. Heerkani waxaa lagu magacaabaa **Cudurka TB da**.



Waad **qaadsiin kartaa** TB da dad **kale**.

Waxaa dareemi kartaa xanuunada ah:

- Xumad
- Qufac (saddex usbuuc ka badan)
- Daal
- Miisaankaada oo is dhima
- Habeenkii oo aad dhididid

Waa in aad qaadata daawo si aad uga caafimaado TB da. Takhtarkaada ayaa go'aaminaayo inta aad dawada wadeysid. Daawada TB da waa lacag la'aan!



Waa waqtigii laga adkaan lahaa TB da!